



Lacagaha joogtada ah ee caymiska Apple Health (Medicaid)

- Barnaamijyada Apple Health ee u baahan bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiska waxaa ka mid ah:
- Apple Health loogu talagalay Carruurta leh Lacagaha Joogtada ah ee Caymiska (sidoo kale loo yaqaanno CHIP)
- Apple Health loogu talagalay Shaqaalaha Naafada ah (HWD)

Marka lagu oggolaado barnaamij Apple Health oo u baahan lacag-bixin joogto ah, Xafiiska Dib-u-helidda Maaliyadaha (OFR) ayaa boostada ku soo diri doonna bayaan bille ah kaasoo bixiya qaddarka lacagta joogtada ah iyo macluumaadka ku saabsan sida loo bixiyo.

Sideen barta internet-ka (online-ka) ugu bixin karaa lacagteyda joogtada ah ee Apple Health?

Bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiska waxaa laga bixin karaa barta internet-ka **Secure Access Washington (SAW)** ama boostada. Ma jiro ikhtiyaar telefoonka looga bixin karo waqtigan.

Ka hor inta aan la sameyn lacag-bixinta barta internet-ka laga bixiyo, **akoonka adeegsadaha SAW waa in la sameeyaa** adeegyada lacag-bixinta DSHS-na waa in lagu daraa liiska adeegyadaada.

TALLAABADA KOOWAAD:
Ka-dib marka aad gasho akoonkaaga SAW, dooro Kuddar Adeeg Cusub.

TALLAABADA LABAAD: Dooro waxaan jeclaan lahaa in aan dalacdo liiska adeegyada oo magac ahaan ah.

TALLAABADA SADDEXAAD:
Ka dooro Codso midigta salka taabka Adeegyada Lacag-bixinta.

TALLAABADA AFARAAD: Ku dooro ikhtiyaarada hoos imaanaya qaybta Lacag-bixinnada Lacagaha Joogtada ah ee Caymiska Caafimaadka.

Qaybta Lacag-bixinnada Lacagta Joogtada ah ee Caymiska Caafimaadka, waxaad ku soo gudbin kartaa lacag-bixinnada, hagaajin kartaa digniino, waxaadna cusboonaysiin kartaa macluumaadka xiriirka/bankiga

Sideen caawimaad ugu heli karaa akoonnada SAW?

- Si aad u hesho caawimaadda hagaajinta akoonkaaga adeegsadaha ee SAW, la xiriir SAW adiga oo wacaya 1-855-928-3241
- Si lagaaga caawiyo hagaajinta akoonkaaga lacag-bixinta SAW, kala xiriir Xafiiska Dib-u-helidda Maaliyadaha 1-800-562-6114, ikhtiyaarka 1aad. Bayaankaaga diyaarso markaad wacayso.

Lacag-bixinnada barta internet-ka laga bixiyo ma yihiin dookha kaliya ee aan haysto?

- Si aad boostada ugu soo dirto lacag-bixintaada, hubso in aad ku darto magaca, taariikhda dhalashada, iyo lambarka aqoonsiga macmiilkaaga iyadoo ay la socoto lacag-bixintaada.

Lacag-bixintaada u dir:

DSHS Office of Financial Recovery
PO Box 9501
Olympia, WA 98507-9501

Maxaa dhacaya haddii aan seego bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiska?

Caymiska ayaa loo joojin karaa bixin-waaga lacagaha joogtada ah ee caymiska ka-dib:

- 90 maalmood oo loogu talagalay Apple Health loogu talagalay Carruurta leh Lacagaha Joogtada ah ee Caymiska (CHIP)
- 120 maalmood oo loogu talagalay Apple Health loogu talagalay Shaqaalaha Naafada ah (HWD)

*Haddii kiiskaaga u xirmo lacag-bixin la'aan, waxaad heli doontaa bayaanno loogu talagalay ilaa sannad ama ilaa qaddarka weli lagugu leeyahay aad u bixiso si buuxda.

Maxaan sameeyaa haddii cunugeyga uu leeyahay CHIP oo dakhligeygana uu yaraado?

Haddii dakhligaaga u isbeddelay oo aadna aamisan tahay in cunugaaga uu u qalmo Apple Health bilaash ah oo carruurta loogu talagalay, waxaad isbeddelkan ku soo sheegi kartaa **Washington Healthplanfinder**.

Booqo hca.wa.gov/apple-health-children si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Apple Health loogu talagalay Carruurta ee leh Lacagaha Joogtada ah ee Caymiska.

Maxaan sameeyaa haddii aan leeyahay caymiska HWD oo aan shaqo joojiyo?

Haddii aad leedahay HWD oo aadna joojiso in aad shaqeyso, wac 1-800-871-9275 si aad farriin ugu dhaafto hawlweennada loo xilsaaray. Si toos ah ayay kuula soo xiriiri doonnaan waxayna si maalinle ah u eegaan khadkooda farriinta tooska ah. Booqo hca.wa.gov/hwd si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska HWD.

Aniga mas'uul kama ihi bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiska. Ma u baahanahay in aan wax gaar ah ku sameeyo akoonkeyga SAW?

Haddii aan lagaaga baahnayn in aad bixiso lacagaha joogtada ah ee caymiska, waxaad joojin kartaa in qaansheeg ama biilka lagu soo diro. Haddii aad jadwaleysay lacag-bixinno otomaatik ah, xusuusnow in aad ku baajiso ama ku joojiso akoonkaaga SAW iyo/ama bankigaaga.

Ma in aan sugaa isticmaalka caymiska ilaa aan ka helayo biilkeyga lacagaha joogtada ah ee caymiska ugu horreeya?

Maya. Uma baahnid in aad sugto ilaa aad ka helayso biilka lacagaha joogtada ah ee caymiska si aad u bilowdo isticmaalka caymiskaaga.

Halkeen u raadsan karaa macluumaad badan?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiska Apple Health, booqo hca.wa.gov/pay-ah-premium.